

Doorashada aan



caadiga ahayn ee Duqa Magaalada

Juun 26

Codso inaad Ku Codaysid Boosta

Doorashadan aan caadiga ahayn waxaad dooran kartaa inaad ku codaysid boosta. Soo gudbi codsigaaga inta u dhexaysa Maajo 1 - 26 toronto.ca/VoteByMail.

Ku Bilow MyVote

Laga bilaabo Maajo 1, hubi inaad ku jirtid liiska cod-bixiyayaasha, ka hel xaafaddaada iyo musharaxiinta u tartamaya duqa magaalada [Toronto.ca/MyVote](https://toronto.ca/MyVote).

Taariikhaha Muhiimka ah

Maajo 1

- Maalinta ugu horraysa oo la codsado **Ku Codaynta Boosta**
- Maalinta ugu horreysa ee wax lagu daro, wax la beddelo ama la cusboonaysiiyo macluumaadkaaga **liiska codbixiyayaasha**

Maajo 15

- Maalinta ugu horeysa ee la codsado foomka **wakiilashada** oo aad samaysato ballan si laguugu xaqiijiyo Emayl ahaan VoterRegistration@toronto.ca ama wac 311

Maajo 23

- **Kaadhka Macluumaadka Cod-bixiyaha (VICs)** waxa loo diraa cod-bixiyayaasha xaqa u leh
 - keliya codbixiyayaasha xaqa u leh ee ku jira liiska codbixiyayaasha maalinta Maajo 14, 2023 ayaa VIC ku heli doona boosta. Haddii aad ku jirtid liiska cod-bixiyayaasha oo aadan VIC ku helin boostada, waxaad ka heli kartaa kaadhkaaga adoo isticmaalaya Myvote toronto.ca/MyVote.

Maajo 26

- Xilliga kama dambaysta ah ee codsiga **Codaynta Boosta**, waa 4:30 galabnimo.

Juun 8 ilaa Juun 13

- Lix maalmood oo ah **codbixin la soo hormariyey** laga bilaabo 10 subaxnimo ilaa 7 galabnimo

Juun 15

- Xirmooyinka **Codaynta Boosta** ee la dhammaystiray waa in la helaa duhurkii (12 p.m.)

Isniin, Juun 26

- Maalinta doorashada laga bilaabo 10 subaxnimo ilaa 8 galabnimo

Xulashada Codaynta

Qof Ahaan

Waxaad u codayn kartaa qof ahaan mid ka mid ah maalmaha cod bixinta ee diyaarsan. Horey u codee inta lagu jiro cod bixinta (June 8 ilaa 13) ama maalinta doorashada, Isniinta, Juun 26.

Ku Codee Boosta

Tallaabada 1aad: Codso Codaynta Boosta

- Laga bilaabo Maajo 1, booqo toronto.ca/VoteByMail
- Xilliga kama dambaysta ah ee codsigu waa Jimcaha, Maajo 26 saacada 4:30 galabnimo.

Tallaabada 2aad: Buuxi xirmadaada

Marka la oggolaado, laga bilaabo Maajo 23 waxaa lagu soo diri doonaa xirmada Codeynta Boosta si aad u dhammaystirto.

- **Saxeex** Foomka Caddaynta
- **Calaamadi** warqadda codbixinta
- **Geli** buqshadda sirta ah ee xiran Buqshadda hurdiga ah ee soo Celinta

Tallaabada 3aad: Dir Xirmadaada

- U soo qaado xirmadaada dhamaystiran sanduuq kasta oo Boosta Canada ama gacanta ugu gee mid ka mid ah sanduuqyada hurdiga ah ee Doorashooyinka Toronto.
- Xaafad walba waxay lahaan doontaa hal sanduuq oo huruud ah oo la heli karo laga bilaabo Juun 1. Goobuhu waxay ku taxanyihiin: toronto.ca/VoteByMail
- Xirmooyinka la dhammaystiray waa in la helaa **duhurnimada (12 p.m.) ee Juun 15.**

Wixii su'aalo ah ama macluumaadka gelitaanka

- Emailgaree elections@toronto.ca ama wac 311
- Wax badan ka baro: toronto.ca ama wac 311

Wakiilasho



Haddii aadan awoodin inaad ku codeyso qof ahaan ama boosta, waxaad magacaaban kartaa wakiil codbixineed. Wakiilku waa qof aad ku kalsoon tahay inuu ku codeeyo magacaaga oo ah codbixiye u qalma doorashadan2023 ee aan caadiga ahayn ee duqa magaalada. Buuxi foomka ballanta wakiilka Codaynta, oo aad saxeedeen adiga iyo wakiilkaagu, oo uu ansixiyey karraaniga magaaladu ka hor Juun 26 saacadu markay tahay 4:30 galabnimo.

Laga bilaabo May 15, la xiriir Doorashooyinka Toronto si aad u hesho foom wakiil oo samee ballan si aad u xaqiijiso adigoo u diraya VoterRegistration@toronto.ca ama wac 311.

Wax badan ka baro toronto.ca/ByElection

Yaa Codayn Kara

Si aad u codaysid doorashadan aan caadiga ahayn ee 2023 ee duqa, waa inaad:

- Tahay muwaadin Canadian ah; iyo
- Ugu yaraan 18 sano jir ah; iyo
- Tahay deggane magaalada Toronto; ama
- Madeggane magaalada Toronto, laakiin adiga ama xaaskaagu ku leedihiin guri ama idiinka kireeysan yahay; iyo
- qof aan sharcigu ka mamnuucin codaynta.

Waxa aad codayn kartaa hal mar iyadoon la eegayn inta guri ee aad ku leedahay ama aad ka kiraysatay gudaha magaalada.

Gal diiwaanka cod bixiyayaasha

Waa muhiim in la hubiyo in macluumaadkaaga ku jira liiska cod-bixiyayaashu uu sax yahay, gaar ahaan haddii aad guurtay ama beddashay magacaga tan iyo doorashadii hore. Haddii aad ku jirtid diiwaanka codbixiyayaasha waxaad boosta ku heli doontaa kaarka macluumaadka codbixiyaha.

Laga bilaabo Maajo 1 ilaa Maajo 26, hubi, ku dar ama cusboonaysii macluumaadkaaga liiska codbixiyayaasha adigoo:

- Booqanaya toronto.ca/MyVote
- Emailgaraynaya VotersRegistration@toronto.ca
- Wacaya 311

Wixii ka dambeeya Maajo 26, waxaad qof ahaan isku dari kartaa liiska cod-bixiyayaasha marka aad qof ahaan u codaysay xilliga codbixintii la soo hormariyey (June 8 ilaa 13) ama maalinta doorashada (June 26).

Waa inaad keentaa aqoonsigaaga marka aad codaynaysid, xataa haddii aad ku jirtid diiwaanka codbixiyayaasha.

Maalmaha codaynta

Maalinta Doorashada

Isniin, Juun 26, 2023 laga bilaabo 10ka subaxnimo ilaa 8 galabnimo. Haddii aad dooratid inaad codaysid maalinta doorashada oo aad leedahay ama kiraysato guryo badan, hal mar oo kaliya ayaad codayn kartaa waana inaad ka codaysaa xaafadda aad ku nooshahay.

Maalmaha Codbixinta La Soo Hormariyey

Horey u codee inta lagu jiro lixda maalmood oo codbixinta la soo hormariyey, Khamiis, Juun 8 ilaa Talaadada, Juun 13 laga bilaabo 10ka subaxnimo ilaa 7da galabnimo.

Ka raadso goobaha codbixinta la soo hormariyey kaadhkaaga macluumaadka codbixiyaha, adoo isticmaalaya MyVote ama booqo [Toronto.ca/AdvanceVote](https://toronto.ca/AdvanceVote). Inta lagu jiro maalmaha cod bixinta la soo hormariyey waxaad ka codayn kartaa mid ka mid ah goobaha cod bixinta ee magaalada oo dhan.

Macluumaad ardaydu leedahay

Haddii aad tahay arday oo aad u aqoonsantahay "gurigaagu" inuu yahay meesha aad ku nooshahay marka aanad dheganayn dugsiga, taas oo macnaheedu yahay inaad qorsheynayso inaad halkaas ku noqoto, markaa waxaad xaq u leedahay inaad ka codayso degmadaada "guriga" iyo degmada aad hadda ku nooshahay oo aad dugsiga ka dhiganaysid. Wax badan ka baro toronto.ca/ByElection.

MyVote

Codsiga shabakada MyVote waxa ay leedahay wax walba oo kuu sahlaya inaad bilowdid doorashada 2023 ee aan caadiga ahayn ee duqa magaalada.

Laga bilaabo Maajo 1, booqo toronto.ca/MyVote oo geli ciwaankaaga Toronto:

- Ogow inaad ku jirtid diiwaanka cod-bixiyayaasha
- Wax ku dar, wax ka beddel ama cusboonaysii macluumaadkaaga diiwaanaka cod bixiyayaasha (ilaa Maajo 26)
- Eeg musharixiinta u tartamaya duqa magaalada
- Ogow xaafaddaada iyo khariidadda
- Arag, soo dejiso ama daabaco kaadhkaaga macluumaadka codbixiyaha (laga bilaabo Juun 1)

- Ogow meesha iyo goorta la codeynayo (laga bilaabo Juun 1)
- Soo hel macluumaadka gelitaanka ee ku saabsan goobtaada codbixinta (laga bilaabo Juun 1)
- Arag muunadda warqaddaada codbixinta (laga bilaabo Juun 1)

Sii wad inaad hubiso MyVote ka hor intaadan shaqsi ahaan u codayn, maadaama goobaha codbixintu ay isbeddeli karaan.

Kaadhka Macluumaadka Cod-bixiyaha

Kaadhadhka macluumaadka codbixiyayaashu (VICs) waxay ku jiraan boosta laga bilaabo Maajo 23. La tegistaada VIC kaaga goobta cod bixintu waxay sahlaysaa habka cod bixinta. VIC kaaga looma isticmaali karo aqoonsi ahaan.

Uma baahnid VIC si aad u codeysid.

- Haddii aad ku jirtid liiska codbixiyayaasha oo aadan helin VIC kaaga, laakiin qof qoyskaaga ka tirsani uu helay, tani waxay noqon kartaa sababtoo ah Boosta Canada waxay boosta ku soo dirtaa kaadhada qaab koox koox ah.
- Haddii aad hesho wax ka badan hal VIC, keen kaadhka ugu saxsan ee u dhigma aqoonsigaaga goobta cod bixinta marka aad codaynayso.
- Haddii aad hesho VIC, laakiin macluumaadku khaldan yahay, waxaad qaadan kartaa kaadhka marka aad codaynayso oo aad wayddiisato inaad buuxiso Codsiga Wax ka bedelka Liiska Codbixiyayaasha.
- Haddii aad hesho VIC qof aan la noolayn qoyskaaga, waxaad ku qori kartaa **Ku celi Soo diraha** kaadhka oo ku rid sanduuqaad doontid ee boosta Canada.

Wax badan ka baro: toronto.ca/VIC

Macluumaadka Helitaanka

Haddii aad caqabad kala kulanto cod bixinta, kala xiriir Doorashooyinka Toronto adigoo Emaylka u soo diraya election@toronto.ca ama wac 311.

Goobaha codbixinta

Dhammaan goobaha aad ku codaynaysid oo dhan waxay leeyihiin taageerada laxaad li'ida. Macluumaadka ku saabsan goob kasta, tusaale ahaan xiriiriyayaal (ramps), albaabada otomaatigga isu fura amaba Terminalka Caawinta Codbixiyaha, ayaa laga heli karaa: toronto.ca/ByElection.

Qalabka cod bixinta ee la heli karo

Saldhigga Caawinta Codayntu waa qalab ka caawiya co-bixiyayaasha naafada ah inay u calaamadeeyaan cod-bixintooda si gaar ah iyo si madax-bannaan. Astamaha waxaa ka mid ah shaashad taabasho ah, shaqo maqal ah, suufka farta indhoolahu kaga shaqeeyaan, aaladda kababka/tuubada, qalab la isugu bed-beddeli karo gacanta/lugta iyo muuqaalada zoom si loo habeeyo cabbirka farta iyo kala duwanaanshaha midabka.

Saldhigyada Caawinta Cod-bixiyaha ayaa laga heli doonaa dhammaan goobaha cod bixinta la soo hormariyey. Haddii aad u baahato isticmaalka Saldhigga Caawinta Codbixiyaha maalinta doorashada oo midina aanay ku ool goobtaada codaynta, waxaad codsan kartaa in lagu wareejiyo warqadda codbixinta adiga oo wacaya 311.

Adeegyo kale

- Codso si aad ugu codeyso boosta haddii aadan awoodin inaad qof ahaan u codeyso. Si aad u dalbato booqo toronto.ca/VoteByMail.
- Tilmaamaha ku saabsan sida loo codeeyo ayaa laga heli doonaa dhammaan goobaha cod bixinta iyagoo ku qoran 26 luqadood.
- Waraaqaha ballaarinta ayaa laga heli doonaa dhammaan goobaha cod bixinta si loo caawiyo cod-bixiyayaasha aragoodu hooseeya.
- Haddii aadan jir ahaan awoodin inaad gasho gudaha goobta cod bixinta waxaad codsan kartaa in lagaa caawiyo meel kale oo ku dhex taal goobta cod bixinta, tusaale ahaan, baarkinka ama marsha biyeediga. Wac 311 wixii macluumaad dheeraad ah.
- Waxaad soo kaxaysan kartaa saaxiib si uu kuu caawiyo haddii aadan awoodin inaad keligaa calaamadiso warqadda codbixinta ama waxaad caawimaad weydiisan kartaa sarkaalka doorashada.
- Dhammaan goobaha codbixintu waxay soo dhaweynayaan isticmaalka dadka wax caawiya iyo xayawaanka adeegga.
- Wareejinta warqadda cod bixinta waxaa la codsan karaa xaaladaha ay codbixiyeyaashu kala kulmi karaan caqabad goobta codbixinta loogu talagalay. Horay u wac 311.

- Haddii aadan awoodin inaad qof ahaan u codayso maalmaha cod bixinta ee jira ama boosta, waxaad ku magacaaban kartaa wakiil codbixineed, emayl ahaan [Voter Registration@toronto.ca](mailto:VoterRegistration@toronto.ca).
- Macluumaadka doorashada ee dhegoolayaasha ama dadka maqalku ku adagyahay ayaa la heli karaa adiga oo wacaya khadka TTY ee 416-338-OTTY (0889).

Wax badan ka baro: toronto.ca/AccessibleElections

Aqoonsiyada la aqbali karo

Aqoonsi (ID) ayaa loo baahan yahay marka aad codaynaysid. Xusuusnow inaad keentid hal kaadh oo aqoonsi ah oo muujinaya magacaaga iyo cinwaanka Toronto ee la xiriira goobtaas codbixinta. Kaadhkaaga Macluumaadka Cod-bixiyaha looma isticmaali karo aqoonsi ahaan.

Tusaalooyin aqoonsiga la Aqbali karo:

- Ruqsadda darawalnimada ee Ontariyo bixisay ama warqadda oggolaanshaha baabuurka (qaybta baabuurka), kaadh sawir le
- Jeeg shakhsi ahaaneed ee la joojiyay, kaadhka deynta ama bayaanka akoonkaaga bangiga.
- Biilasha tamarta ee korontada, teleefoonka ama kaybalka TV-ga, biyaha, gaaska ama biil ka yimid guddiga adeegyada dadweynaha.
- Warqadda lacag bixinta qaybteeda danbe, bayaan T4 ama rasiidh mushahar ee uu bixiyey loo shaqeeye.
- Bayaanka lacag ku shubidda tooska ah ee Ontario Works ama Barnaamijka Taageerada Naafada Ontario.
- Qiimaynta cashuurta hantida, ogaysiis qiimaynta cashuurta dakhliga, Bayaanka Dheefta Cashuurta Ilmaha.
- Bayaan amaah guri, heshiis kiro guri.
- Warqad tusaysa natiijada ardayga ama Kaadh warbixin Jaamaicadeed.
- Dokumenti muujinaya degenaanshaha kambaska, oo uu soo saaro xafiiska ama mas'uuliyiinta ka mas'uulka ah degenaanshaha ardayda ee machad dugsi sare kadib.
- Dokumenti kasta oo kale oo ka socda dawladda Canada, Ontario ama degmo ku taal Ontario ama dokumeenti ay soo saartay ama ay cadeeysay maxkamad Ontario ku taal.
- Dokumenti kasta oo ka socda Golaha Guddi Ontario oo lagu dhisay Xeerka Hindida (Canada).
- Waraaqaha Caymiska ama warbixinta caymiska.
- Heshiis amaah ama heshiis kale oo maaliyadeed oo lala galay hay'ad maaliyadeed.
- Bayaanka Faa'iidooyinka Caymiska Shaqada ee La Bixiyay T4E.

- Bayaanka Hubinta Dakhliga Waayeelka T4A (OAS), Faa'iidooyinka Qorshaha Hawlgabka Canada T4A (P), Bayaanka Qorshaha Hawlgabka Canada ee tabarucaadka.
- Bayaanka Faa'iidooyinka Guddiga Caymiska iyo Badbaadada Goobta shaqada T5007.
- Kaadhka CNIB ama kaadh urur samafal kale ka diiwaan gashan oo bixiya adeegyada dadka naafada ah.
- Dokumenti muujinaya degenaanshaha guriga daryeelka muddada-dheer ee hoos imaanaya sharciga guryaha daryeelka muddada-dheer, 2007, oo uu soo saaray maamulaha gurigu.

Haddii aadan haysan aqoonsi la aqbali karo oo aadan ku jirin diiwaanka codbixiyayaasha, waxaa lagu weydiin doonaa inaad la soo laabato aqoonsigaaga si aad u hesho warqadda cod bixinta.

Baraha bulshada, Shabakadda iyo Emaylka

Twitter: @cityoftoronto

Facebook: City of Toronto

Instagram: @cityofto

Website: toronto.ca/ByElection

Email: elections@toronto.ca

Tarjumaadda Macluumaadka

Haddii aad u baahan tahay macluumaad luqad kale ah wac 311 ama booqo [Toronto.ca/elections/Voters](https://toronto.ca/elections/Voters)